COVID-19 (Karoonfayras) iyo Kabka Caymiska Shaqo La'aanta ee Shaqaaleysiiyayaasha

Su'aalaha iyo Jawaabaha

Su'aasha 1: Miyaan heli karaa kabka shaqo la'aan hadii shaqada la iiga fasaxo arimo la xidhiidha karoonafayras (COVID-19)?
Jawaab: Haa. Kabka shaqo la'aanta ee lowa waxa heli kara shakhsiyaadka bilaa shaqada ah ee aanu khaladku iyaga ka iman. Hadii shaqaaleysiiye ay waajib ku tahay inuu xidho shaqooyinka oo aanay wax shaqo ah jirin, shaqaalihiisu waxay ku haboonaan doonaan kabka shaqo la'aanta hadii ay buuxiyaan shuruudaha lacageed.

Su'aasha 2: Hadii shaqaaleysiiyahaygu shaqada uga fasaxo shaqaalaha wax soosaar yaraan uu sababay Karoonafayras, miyey shaqaaluhu ku haboonaan doonaan kabka caymiska shaqo la'aanta.
Jawaab: Haa. Kabka waxa heli kara shakhsi kasta oo bilaa shaqo u ah sabab aanu danbi ku lahayn. Hadii shaqaaleysiiye shaqada uga fasaxo shaqaalaha waxsoosaar yaraan uu sababay Karoonfayras awgeed, shakhsiyaadku waxay ku haboonaan karaan kabka caymiska hadii ay buuxiyaan shuruudaha lacageed.

Su'aassha 3: Hadii shaqaaleysiiyahaygu si ku meel gaadha uga joojiyo shaqada shaqaalaha sababta shaqo yaraan ama la'aanta uu COVID-19 sababay awgeed, miyey shaqaaluhu ku haboonaan doonaan kabka caymiska shaqo la'aanta?
Jawaabta: Haa. Sharciga lowa wuxuu u ogolaanayaa shaqalaha in si ku meel gaadha shaqada looga joojiyo marka aanay shaqo jirin.

Su'aasha 4: Miyuu shaqaaleysiiyahaygu iiga baahan karaa inaan joogo guriga mudada aan muujisnaayo astaamaha COVID-19? **Jawaabta**: Haa. shaqaalaysiiyahaagu wuxuu kaaga baahan karaa inaad joogtid guriga ugu yaraan 14 cisho hadii aad u safartay dibada ama aad la xidhiidhay qof booqday gobol xanuunku ku faafay. Fadlan kala xidhiidh shaqaaleysiiyahaaga shaqada durugsan, fasaxa xanuunka, mushaharka fasaxa ("PTO"), Xeerka Qoyska & Fasaxa Caafimaad ("FMLA"), Naafada iyo khiyaarada kale ee ay bixin karaan. Hadii mushaharka fasaxu aanu diyaar ahayn, waxaad ku haboonaan kartaa kabka shaqo la'aanta.

Su'aasha 5: Hadii shaqaaleysiiyahaygu iiga baahan yahay inaan joogo guriga iyadooy ugu wacan tahay socdaal dibadeed ama taabashada qof booqday gobol uu saameeyey, miyaan ku haboonahay shaqo la'aan?
Jawaabta: Haa. shaqaalaysiiyahaagu wuxuu kaaga baahan karaa inaad joogtid guriga ugu yaraan 14 cisho hadii aad u safartay dibada ama aad la xidhiidhay qof booqday gobol xanuunku ku faafay. Fadlan kala xidhiidh shaqaaleysiiyahaaga shaqada durugsan, fasaxa xanuunka, PTO, FMLA, Naafada iyo khiyaarada kale ee ay bixin karaan. Hadii mushaharka fasaxu aanu diyaar ahayn, waxaad ku haboonaan kartaa kabka shaqo la'aanta.

Su'aasha 6: Hadii aan ku jiro karantimayn khasab ah maxaa yeelay shaki inaan leeyahay COVID-19, miyaan ku haboonaanayaa inaan helo kabka shaqo la'aanta?
Jawaab: Ku haboonaanshaha waxa loo go'aamin xaalad ka xaalad. Hadii shakiga lahaanshaha COVID-19 uu sax yahay oo baadhitaanaduna muujinayaan suurto galnimo weyn oo qaadisa, waxaad ku haboonaan kartaa kabka mudada soo ifbaxa astaamaha fayraska. Fadlan kala xidhiidh shaqaaleysiiyahaaga shaqada durugsan, fasaxa xanuunka, PTO, FMLA, Naafada iyo khiyaarada kale

ee ay bixin karaan. Hadii mushaharka fasaxu aanu diyaar ahayn, waxaad ku haboonaan kartaa kabka shaqo la'aanta.

Su'aasha 7: Hadii aan u xanuusanaayo COVID-19 oo aanan shaqada tagi karin, miyaan ku haboonaan doonaa kabka shaqo la'aanta?
Jawaab: Haa. Fadlan kala xidhiidh shaqaaleysiiyahaaga shaqada durugsan, fasaxa xanuunka, PTO, FMLA, Naafada iyo khiyaarada kale ee ay bixin karaan. Hadii mushaharka fasaxu aan laga heli karin shaqaaleysiiyahayga, waxa suurto gal ah inaad ku haboonaan kabka shaqo la'aanta lakiin waxaad ku haboonaan kartaa Caymiska Shaqo La'aanta Xanuunka ("PUA").

Su'aasha 8: Hadii shaqaaleysiiyahaygu uu xidho hawl galka ganacsiga maxaa yeelay shaqaale kale ayaa u buka COVID-19, miyaan ku haboonaan doonaa kabka?
Jawaabta: Haa, waad ku haboonaan kartaa kabka.

Su'aasha 9*:* Hadii aan awoodin inaan shaqeeyo maxaa yeelay shaqaaleysiiyahayga ayaa u xidhay shaqada arimo la xidhiidha caafimaadka COVID-19, miyaan u baahanahay inaan dhameystiro shaqo raadin?
Jawaab: Hadii aad gudbisid dacwad natiijada COVID-19 awgeed, lagaagama baahan doono inaad shaqo raadisid? Hadii xaaladaadu isla badesho shaqaaleysiiyahaaga oo aanad qorsheyn inaad ku noqotid shaqada, fadlan nala soo xidhiidh.

Su'aasha 10: Ka waran hadii shaqaaleysiiyahaygu yareeyo saacadaha shaqada maxaa yeelay ganacsiga ayaa yaraaday, miyaan wali ku haboonaan doonaa kabka?
Jawaabta: Laga yaabaa. Iowa waxay ogolaanaysaa kala badh kabka shaqo la'aanta. Waxaad u baahan tahay inaad soo sheegtid mushaharka aad heshay todobaadkasta markii aad sameynaysid codsashada kabkaaga. Nooca dakhligani waxa ku jira: mushaharka, mushaharka fasaxa; fasaxa xanuunka; xaqul shaaha; nasusaacaha, khidmada; iyo lacagta; iyo, magdhow kasta oo aan ahayn lacag cadaana (sida qolka iyo boodhka, tilifoonka). Waxaad qaadan kartaa ilaa 25 boqolkiiba kabkaaga todobaadlahaa ("WBA") ka hor kabka lacagta intaan la yareyn, lakiin wali waxaa jira shuruud inlasoo wariyo dakhliga xataa haduu ka hooseeyo boqolkiiba 25. Dakhliyada ka badan boqolkiiba 25 waxay yareyn doonaan kabka lacagtaada. Hadii aad ka heshid $15 ama in ka badan WBA, ma heli doontid kabka lacagtaada todobaadkaasi. Tusaale:

> WBA-gaaga waa $400 waxaanad helaysaa $370.
>
> 25% ka $400 waa $100. $100 lagama jaraayo WBA.
>
> $370 - $100 = $270. Inta hadhsan $270 waxa laga jarayaa WBA.
>
> $400 - $270 = $130.
>
> $130 waa xadiga lacagta todobaadka.

Su'aasha11*:* Shaqada ayaa la iiga joojiyey COVID-19 awgeed. Waxaan isticmaalay wakhti fasaxa intii lagu jiray shaqo joojintan; miyaan u baahanahay si aan usoo wariyo tan hadii aan kasoo dacwoodo shaqo la'aan?
Jawaab: Mushaharka fasaxaha waxa loo soo warin karaa sababo caymis shaqo la'aaneed. Fadlan u tixgali jawaabta sare.

Su'aasha 12: Sideebay Waaxda Horumarinta Shaqaalaha Iowa ("IWD") u ogaan kartaa inaan si sax ah ugu sheegay mushaharkayga?

Jawaab: Codsi kasta oo lasoo gudbiyo waa la dabagalayaa lana baadhayaa. Shaqaalaysiiyahaagu wuxuu soo wariyaa mushaharka lasiiyo shaqaale kasta saddex bilood oo kasta. IWD waxay leedahay barnaamijk koomiyuutar isbarbardhigaaya mushaharka lasiiyey iyo mushaharka lasoo wariyey marka codsiga lasameeyey. Hadii IWD go'aamiso inaad si joogto ah usoo warisid mushaharka, kab dheeriyaad heli doontaa waxaan ku qaban doonaa ganaax 15%, kuma haboonaan doontid kabka mustaqbalka,danbi ayaana lagugu xukumi.

Su'aasha 13: Anigu ayaa is shaqaaleysiiyey wakhti ayaanay qaadanaysaa ka hor intaan ganacsigaygu aanu kusoo noqon heerarkiisii xanuunka ka hor. Miyaan wali ku haboonahay kabka?
Jawaab: Laga yaabaa. Kala badh kabku wuxuu diyaar ku yahay PUA. Ilaa iyo inta sacaadaha la yareeyey la xidhiidhaan sababta COVID-19, waad ku haboonaan doontaa. Hadii aad ka heshid $15 ama in ka badan WBA, ma heli doontid kabka lacagtaada todobaadkaasi. Waa inaad soo warisaa dakhli kasta oo aad heshay todobaadkaasi ee adeegyada la qabtay iyo dakhli kasta oo aad heshay ka hor xanuunka mushaharka lagugu siiyey todobaadkaasi.

Su'aalaha14: Aniga ayaa is shaqaaleysiiyey, sidee bay IWD u ogaan kartaa inaan si saxa usoo wariyey dakhligayga? **Jawaab:** IWD waxay dabi gali oo ay baadhi doontaa sheegashadaada lasoo xareeyey. Waxaad cadeyaysaa sheegasha kasta inaad soo gudbinaysid macluumaad saxa oo runa. Hadii lagugu helo inaad si beena usoo warisay codsigaaga kabka shaqo la'aanta waxaa lagugu xukumi doonaa danbi iyo ganaax.

Su'aasha 15: Miyaa COVID-19 loo tixgaliyaa masiibo, oo miyaan heli karaa Caawimada Masiibada Shaqo la'aanta hadii aanan ku habooneyn kabka caymiska shaqo la'aanta?
Jawaab: Masiibo kumuu dhawaaqin madaxweynuhu si loo caawiyo shakhsiyaadka. Hadii madaxweynaha Mareykanku ugu dhawaaqo COVID-19 masiibo qaran, oo shakhsiyaadku waajahaan shaqo la'aan lowa sababtaasi darteed, waxay ku haboonaan karaan kabka shaqo la'aanta iyo/ama Caawimada Masiibada Shaqo la'aanta ("DUA").

Su'aasha 16: Ka waran hadii aan qaado COVID-19 intaan shaqada ku jiro; miyaan helayaa kabka?
Jawaabta: Fadlan kala xidhiidh shaqaaleysiiyahaaga shaqada durugsan, fasaxa xanuunka, PTO, FMLA, Naafada, Magdhowga Shaqaalaha iyo khiyaarada kale ee ay bixin karaan. Hadii mushaharka fasaxu aanu diyaar ahayn, waxaad ku haboonaan kartaa kabka shaqo la'aanta.

Su'aasha 17: Ka waran hadii aan leeyahay COVID-19 oo aan shaqada ka tago, miyaan ku haboonahay kabka?
Jawaabta: Xaaladkasta waxa lagula tacaali doonaa iyadoo loo eegayo xaqiiqooyinka kala taga. Waxaad codsan kartaa kabka caymiska shaqo la'aanta hadii uu shaqada kaaga joojiyey ama ka tagtay shaqaaleysiiyahaagu oo aanad hada shaqeyneyn. Go'aan ayaa lagu qaadan doonaa sababaha kala taga. Hadii aanad ku habooneyn kabka gobolka, waxaad wali u gudbi kartaa kabka PUA.

Su'aasha 18: Shaqada ayaan kusoo noqday lakiin waxaan umaleynayaa deegankayga shaqadu maaha mid badqaba, miyaan iska joojin karaa walina heli karaa kabka shaqo la'aanta? Ma lihi xaalad hore oo caafimaad ama la xidhiidha xanuunka COVID-19.
Jawaab: Waa inaad marka hore kala hadashaa shaqaaleysiiyahaaga walaacyadaada iyo, hadii ay daruur tahay, dhakhtarkaaga. Hadii shaqaaleysiiyahaagu qaadayo talaabooyin uu ku amuurayo goob shaqo oo badqabta, tusaale, siinta lacag dheeriya, nadaafad dheeriya, PPE sida masaakarada ama golofisyada, ama raacista talooyinka kala fogaanshaha bulshada, kuma haboonaan doontid kabka caymiska shaqo la'aata hadii aad iskaga tagtid shaqadaada. Hadii shaqaaleysiiyahaagu diidayo inuu u hogaansamo talaabooyinka iyo tilmaamaha OSHA ee ay kula talisay dawlada gobolka ama fadaraalku

shirkadaada, ka dib waxaad ku haboonaan kartaa inaad heshid kabka shaqo la'aanta. Si kastaba ahaatee, hadii aad ku haboon tahay kabka shaqo la'aanta waa xaqiiqo gaara waxaana lagu go'aamin doonaa xaalad xaalad. Hadii shaqaaleysiiyahaagu uu diido codsigaaga, waxay u baahan doontaa wareysi xaqiiqo raadisa ka hor intaan kabka la bixin. Tani waa run iyadoon loo eegayn nooca kabka shaqo la'aanta ee aad ku haboon tahay.

Su'aasha19: Ka waran hadii aan aaminsahay in goobtayda shaqadu aanay amaan ahayn oo aan leeyahay xaalad hore ama muhiima xaalad caafimaad oo khatar iigalinaysa COVID-19? Miyaan iska joojin karaa oo aan walina heli karaa kabka?
Jawaab: Waa inaad kala hadashaa dhakhtarkaaga iyo shaqaaleysiiyahaaga walaacyadaada. Hadii shaqaaleysiiyahaagu si cad u diido diyaarinta uu u baahan yahay dhakhtarkaagu iyadoo ay ugu wacan tahay xaalad caafimaad oo hore, ama hadii aanu awoodin inuu kusiiyo deegaan shaqo oo badqabam (sida kasoo shaqo taga guriga), waxaad ku haboonaan doontaa kabka shaqo la'aanta hadii aad ka tagtid shaqada hadii shaqaaleysiiyahaagu diido inuu ku fasaxo.

Su'aasha 20: Ka waran hadii aan leeyahay cabsi shaqo, ama qabashada shaqadeyda maxaa yeelay waxaan ka baqayaa inaan la xidhiidho qof qaba COVID-19. Ma lihi xaalad hore oo caafimaad; kaliya ma rabo inaan shaqeeyo intay tani socoto. Hadii aan ka tago shaqada ama diido inaan shaqeeeyo miyaan ku haboonaan doonaa kabka?
Jawaabta: Hadii aanad tagi shaqada, ama aanad kusoo noqon shaqada, tani waxaa loo tixgalin doonaa shaqo ka tagis iskaa ah, shaqo ka tagis rasmiya, ama diidmo shaqo kusoo noqosho. Fadlan kala xidhiidh shaqaaleysiiyahaaga shaqada durugsan, fasaxa xanuunka, PTO, FMLA, Naafada iyo khiyaarada kale ee ay bixin karaan. Hadii aanad ku habooneyn mushahar fasax, waxaa lagaaga baahan doonaa inaad shaqeysid oo hadii aad ka tagtidna, kuma haboonaan doontid kabka shaqo la'aanta.

Hadii aanad ku habooneyn kabka shaqo la'aanta ee dawlada, waxaad codsan kartaa PUA. Qaar ka mida sababaha aad u diidi kartid shaqada ee ay ka dhalan karto ku haboonaansho la'aanta kabka shaqo la'aanta ee PUA waxa ka mida, lakiin aan lagu koobin:

1. Waxaa lagaa helay COVID-19 ama waxaad waajahaysaa astamaaha.
2. Xubin ka tirsan qoyskaaga ayaa laga helay COVID-19.
3. Waxaad daryeel siinaysaa qof ka tirsan qoyskaaga oo laga helay COVID-19.
4. Adiga ama qof ka tirsan qoyskaaga ayaa ah kuwa halista ugu jira daryeel bixiyahaaga caafimaad ayaana ku taliyey iskarantimeyn walaacyada COVID-19 awgii.
5. Waxaanad haysan daryeelka caruurta ee daruuriga ah lana xidhiidha COVID-19.
6. Ma gaadhi kartid goobta shaqada sababtoo ah karantimaynta COVID-19 awgeed.
7. Waxaad lahayd COVID-19 waanad ka bogsatay, lakiin wuu kaa xanibay shaqooyinkaagii inaad si fiican u qabsatid.

Maclumaad dheeriya iyo tilmaamo sida loo codsado PUA waxay diyaar ku yihiin: https://www.iowaworkforcedevelopment.gov/pua-information

Su'aasha21: Waxaan aaminsanahay inaan ka sameyn karo lacag kabka shaqo la'aanta in ka badan intii shaqada, ma iskaga tagi karaa shaqada?
Jawaabta: Maya. Waa in lagaa joojiyaa shaqada, si ku meel gaadha, ama la yareeyaa saacadaha shaqada ee shaqaaleysiiyahaga si aad ugu gudubtid kabka. Hadii aad iskaga tagtid shaqada, diidid shaqada, ama diidid inaad ku noqotid adoon ku habooneyn mushaharka fasaxa; waa lagaa saari doonaa kabka. Inaad kaliya shaqadaada uga tagtid si aad u ursatid kabka waa wax isdaba marin

waxaana ka dhalan kara waayista kabka iyo sidoo kale danbi iyo ganaax.

Su'aasha 22: Hadii la isiiyo kabka caymiska shaqo la'aanta, oo marka danbena la go'aamiyo in la iga saaro kabkaasi, miyaan u baahan doonaa inaan dib u bixiyo kabka aan helay?
Jawaabta: Haa. Hadii go'aanka kama danbeysta ah uu yahay inaanad ku habooneyn, waa inaad soo celisaa kabkaasi.

Su'aasha 23: Hadii la go'aamiyo inaan sameeyey wax isdaba marin anoo diidaya xaqiiqooyinka la xidhiidha sheegashadayda, maxaa dhacaya?
Jawaabta: If you are determined to have committed a fraud to obtain unemployment insurance benefits, you will be referred for criminal prosecution. Waxaanad sidoo kale awoodi doonin inaad codsatid kabka marlabaad ilaa iyo aad dib u bixisid kabka oo lagu daray 15% ganaax fadaraalku ku khasbay kabka la isdaba mariyo.

Su'aasha 24: Hadii aan hada helaayo kabka shaqo la'aanta oo aanan awoodin inaan helo shaqo iyadoo ay ugu wacan tahay inaan shirkado shaqaaleysiineyn maxaa yeelay COVID-19 awgii, miyaan ku haboonahay kordhin?
Jawaabta: Xeerka CARES waxa ka mida Magdhowga Shaqo La'aanta Xaalada Degdega ee Xanuunka ("PEUC") taasoo kordhinaya kabka codsadayaasha kuwaasi oo dhameeyey kabkooda shaqo la'aanta ee gobolka oo codsigooduna dhamaaday. Faahfaahin dheeriya, fadlan booqo: https://www.iowaworkforcedevelopment.gov/peuc-information.

Su'aasha 25: Waxa la iga helay COVID-19, waxaana la dhigay cisbitaalka iyo/ama karantimeeyey. Shaqaaleysiiyahaygii shaqadii ayuu iiga eryey in aanan iman shaqada ama aanan soo wicin. Miyaan ku haboonahay kabka xaaladani?
Jawaabta: Xaaladani waxa loola dhaqmi doonaa kala saaris waxaa go'aan looga gaadhi doonaa iyadoo loo eegaayo sharciga Shaqo La'aanta lowa. Hadii aanad ku habooneyn sharciga gobolka, waxaad ku haboonaan kartaa kabka kale ee PUA.

Su'aasha 26: Waxaan halis u galay COVID-19 shaqaaleysiiyahayguna wuu ogaaday wuxuuna ii sheegay inaanan iman shaqada 2 todobaad. Miyaan ku haboonahay kabka madaamoo shaqaaleysiiyahaygu ii ogolaan doonin inaan imaado shaqada? **Jawaabta**: Waa inaad kala shaqeysaa shaqaaleysiiyahaaga waxa fasaxaha aad heli kartaa noqon karo inta lagu jiro wakhtiga aanay kuu ogalaan doonin inaad kusoo noqoto shaqada. Hadii mushaharka fasaxu aanu diyaar ahayn, waxaad ku haboonaan kartaa kabka shaqo la'aanta.

Su'aasha 27: Ka waran hadii cida igu tiirsan, qofka ka tirsan qoyskayga ama ilmahaygu laga joojiyey dugsi oo ay tahay inaan joogo guriga oo aan daryeelo iyaga, miyaan ku haboonaanayaa shaqo la'aanta?
Jawaabta: Fadlan kala xidhiidh shaqaaleysiiyahaaga kasoo shaqeynta guriga. Waxa suurto gal ah inaad ku haboonaatid mushaharka fasaxa labo todobaad ee hoos yimaada Xeerka Jawaabta Koobaad Karoonfayras ee Qoyska (FFCRA). Waa inaad la xidhiidhaa shaqaleysiiyahaaga si aad u siisid dukumentiyada daruuriga ah ee khuseeya xaaladadaada. Hadii guri kasoo shaqeynta ama mushaharka fasaxuhu aanu diyaar ahayn, waxaad codsan kartaa kabka caymiska shaqo la'aanta. Hadii aanad ku habooneyn kabka gobolka, waxaad ku habooneyn kabka hoos yimaada PUA.

Su'aasha 28: Kuma habooni kabka shaqo la'aanta gobolka eeay sababtay shaqo ka tagisya ama maxaa yeelay ma awoodo umana diyaar ahi shaqada sababta COVID-19 awgii, miyaan ku haboonahay Xeerka CARES?
Jawaab: Laga yaabaa. Hadii aanad ku habooneyn inaad heshid kabka gobolka, waxaad u baahan tahay inaad codsatid PUA. Macluumaad dheeriya, fadlan booqo: https://www.iowaworkforcedevelopment.gov/pua-information. Waxaad tagi doontaa Talaabada 3 oo buuxi xog

wareysiga markaad dooratid "Gudbi Cadeynta Dakhliga."

Su'aasha 29: Hadii aan ku haboonahay, goormaan helayaa $600 lacagtayda dheeriga ah?
Jawaabta: Lacagta $600 waxay bilaabeen in ay soo saareen codsiyada ugu badan ee ku haboon oo ay ku jiraan kabka shaqo la'aanta marka laga reebo kabka kordhinta tababarka iyo kabka xidhitaanka ganacsiga. Hadii aad dooratay in cashuuraha laga saaro kabkaaga, lacagtaada waa la yareyn doonaa. Hadii aad aaminsan tahay in codsigaagu ku haboon yahay $600 dheeraada oo aanad helin, fadlan kala xidhiidh adeega macmiilka uiclaimshelp@iwd.iowa.gov.

Su'aasha30: Hadii aan ku haboonahay oo aan helo kabkayga $600, miyan wali helaya kabkayga oo dhameystiran **Jawaab**: Haa, kabka $600 wuxuu dheeraad ku yahay shaqo la'aanta, lagama jaraayo kabka todobaadlaha ah ee ay heli doonaan.

Su'aasha 31: Hadii aan helo $600 lacagta todobaadkiiba ama kabkasta oo kale oo fadaraala oo mar danbe la go'aamiyo inaan heli doonin, ma inaan dib u bixiyabaa lacagta?
Jawaab: Haa, kabkasta oo caymiska shaqo la'aanta ee aad heshid oo marka danbena la go'aamiyo inaanad ku habooneyn inaad heshid, waxaa lagaaga baahan doonaa inaad dib u bixisid.

Su'aasha 32: Hadii la iga saaro helitaanka kabka shaqo la'aanta gobolka ama fadaraalka, miyaan wali heli doonaa kabka fadaraalka ee $600 todobaadkiiba?
Jawaab: Maya, waa inaad ku haboonaataa kabka caymiska shaqo la'aanta gobolka ama fadaraalka si aad ugu haboonaatid inaad heshid $600 dheeriga ah todobaadkiiba.

Su'aasha 33: Hadii loo baahdo, miyey RESEA iyo/ama balamaha Shaqooyinka laga soo sameyn kari doonaa tilifoonka?
Jawaabta: Waxaanu ka shaqeynaynaa barnaamiyada la xidhiidha tilmaamaha iyo isticmaalka tiknoolajiyada gudbinta adeega waxaan kasoo war bixin doonaa markay sidaasi diyaar u noqdaan.

Su'aasha 34: Hadii koolajyadu sii wadaan in ay xidhaan ama onlyaan tagaan, sideebay taasi u saameyn doontaa xafiiska maxaliga ilaa iyo shaqaalaha?
Jawaabta: Barnaamijka Title I Adult, Joojinta Shaqaalaha, iyo Dhalinyarada, iyo sidoo kale barnaamijka Caawimada Hagaajinta Ganacsiga ("TAA"), ay sii wadaan siinta adeegyada reer lowa inta lagu jiro wakhtigan adag. Adeegyada waxaa loo bixin doonaa hab tilifoonka laga qabanaayo.

Su'aashada 35: Iyadoo koolajyadu tixgalinayaan xidhitaanka iyo u guurista casharada oo onlaayn ah dhaamaantood. Maxaa dhici hadii ay shuraakada Title I raacaan amarkaasi oo aanay iman xarumaha?
Jawaabta: Barnaamijyada Title I Adult, Joojinta Shaqaalaha, iyo Dhalinyarada, iyo sidoo kale barnaamijka TAA, sii wadaan siinta adeegyada reer lowa inta lagu jiro wakhtigan adag. Adeegyada waxaa loo bixin doonaa hab tilifoonka laga qabanaayo.

Su'aasha 36: Waxaan ahay macalin ku jira Fasaxa Gu'ga. Miyaan ku haboonahay kabka shaqo la'aanta? **Jawaabta**: Maya, maaha inta lagu jiro fasaxa la diyaariyey hadii aad saxeexday heshiiska oo ay ugu wacan tahay shuruucda caymiska ee macquulka ah. Hadii aad wali buuxinaysid kabka iyadoo ay ugu wacan tahay shaqo aan jirin fasaxa gu'ga ka dib, waxaad ku haboonaan doontaa kabka kaliya hadii aanad ka helayn mushahar shaqaaleysiiyahaga.
Si kastaba ahaatee, hadii shaqaaleysiiyahaagu dib kusoo waco, waa inaad awoodaa inaad kusoo noqotid shaqada. Hadii aanad awoodin inaad kusoo noqotid shaqada ka dib wicitaan ku haboonaashahaaga kabka su'aal baa la galin doonaa.

Su'aasha 37: Waxaan ahay macalin shaqada uga maqan COVID-19, maaha fasax qorsheysan.

Miyaan ku haboonahay kabka caymiska shaqo la'aanta inta lagu jiro wakhtiga dugsigaygu xidhan yahay?
Jawaab: Laga yaabaa. Hadii dugsigu sii wadaayo inuu kusiiyo mushaharka waxaad u baahan doontaa inaad soo warisid dakhligaaga todobaadlaha ah inta lagu jiro wakhtigan waxaana suurto gal ah inaad heshid dakhli badan si aad ugu haboonaatid kabka. Hadii dugsiga degmadu aanu ku siineyn mushaharka, ka dib haa, waxaad aad ugu haboonaan doontaa kabka. Si kastaba ahaatee, hadii shaqaaleysiiyahaagu dib kuugu soo waco shaqada, waa inaad awoodaa inaad kusoo noqotid. Hadii kale ku haboonaanshahaaga su'aal ayaa la galin doonaa.

Su'aasha 38: Waxaan ahay caawi macalin dugsigayguna wuu xidhan yahay. Mushahar la ima siin doono inta dugsigaygu xidhan yahay. Miyaan ku haboonahay kabka caymiska shaqo la'aanta?
Jawaabta: Hadii aad ku jirtid fasax qorsheysan sida Fasaxa Gu'ga ee todobaadka, kuma haboonaan doontid todobaadkaasi. Hadii aanad ku jirin fasax qorsheysan waxaad ku haboonaan doontaa kabka. Si kastaba ahaatee, hadii shaqaaleysiiyahaagu dib kusoo waco, waa inaad awoodaa inaad kusoo noqotid shaqada. Hadii aanad awoodin inaad kusoo noqotid shaqada ka dib wicitaan ku haboonaashahaaga kabka su'aal baa la galin doonaa.

WARGELIN: Wakhtigani, IWD lacag kama qaadayso codsiyada shaqaaleysiiyayaasha ee ay saameeyeen shaqaaluhu sababta shaqo la'aanta COVID-19 awgeed. Waxaan asaasnay hadhaaga Sanduuqa Lacagta Caymiska Shaqo La'aanta taasi oo ay daruuri noqon doonto in la bilaabo lacagta laga qaadayo shaqaaleysiiyayaasha ee codsiyada shaqo la'aanta. Waxaan diyaarinay $950M oo hadhaaga sanduuqa lacagtuna hada waa $1.10B ama $180 milyan dolar lacagta $950 milyana ah. Go'aankani waxa loo sameeyey in lagu caawiyo kasoo kabashada iyadoo la yareynayo korodhkasta oo ay
ku waajihi karaan cashuurta shaqo la'aanta oo ku saleysan qeyb weyn oo hadhaaga lacagta sanduuqa. Codsiyada Xeerka CARES ee iskood u shaqeysayaasha iyo kabka $600 todobaadlaha ah lagama bixin doono lacagta sanduuqa.

Macluumaad dheeriya waxaa laga heli karaa iowaworkforcedevelopment.gov. Fadlan u hubi bogayaga si maalinle ah madaamo aan cusbooneysiinayno dhamaan macluumaadka aan helno.

Su'aalahan sare iyo Jawaabahan waxa loogu talo galay in laga jawaabo su'aalaha asaasiga ah ee aan helno. Wax ka mida tilmaamahani maaha talo sharci; mana loogu talo galin in loo isticmaalo wax la mida. Hadii aad su'aalo qabtid, fadlan u tixgali Sharciga Hubinta Shaqada lowa ee laga helaayo Xeerka lowa
§ 96. tilmaamo iyo macluumaad dheeriya waxa sidoo kale laga heli karaa Waaxda Fadaraalka ee Shaqaalaha oo laga heli karo www.dol.gov/coronavirus.